

MAXAA KA SOCDA BUUNDADA GALBEEDKA SEATTLE?

WAXEY KU SOCOTAA IN DIB LOO FURO BARTAMAHA 2022





KA SOO QEYB GALA KULANKEENA GUUD MUUQAALKA AH EE JUULAY 21

Wax badan ka maqal shaqada aanu heyno su'aalahaagana weydii. Waxanu ku bixin doonaa qoraallo toos ah ka muuqan doona shaashadda iyo tarjubaanimo luqadaha Isbaanishka, Mandariin, iyo Fiyetnaamiis. Duubis laga sameeyey kulanka waxa lagu boosti gareyn doonaa goor dambe onleen oo ay la socon doonaan qormooyin ku hoos qoran oo Isbaanish, Kuuriyaan, Fiyetnamees, Shiinees, Khamer, Soomaali, iyo Oromo. Si aad u weydiisato luqado dheeri ah, la wadaag sida aad ugu baahan tahay ka qeyb galka, ama weydiin su'aalo, fadlan nagala soo xiriir 206-400-7511 ama WestSeattleBridge@seattle.gov.

SIDEE BAAD UGU SOO BIIRI KARTAA KULANKA

Maalinta Arbacada, Juulay 21
saacadda 5:30 nagala soo qeyb gal mid labadan ka mid ah:

- Kombiyuutar ama qalabka lala socdo-halkan riix si aad u gasho zoomka: <https://us02web.zoom.us/j/89190663370>
- Phone – dial (253) 215 8782 and ka dib gal aqoosinga webinar ID: 891 9066 3370



SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Phone: (206) 400-7511

Email: WestSeattleBridge@seattle.gov

Isu diiwaan geli helidda wararka: seattle.gov/westseattlebridge



Seattle
Department of
Transportation

BUUNDADA SARE EE GALBEEDKA SEATTLE WAXEY KU SOCOTAA IN DIB LOO FURO BARTAMAHA 2022

Waad ku mahadsan tihii dulqaadkiina iyo adkeysigiina. Waan la soconaa in buundada xinaashaheeda ay abuureyso caqabado waaweyn. Shaqo adag ayaan wadnaa. Dayactirkii hore ee lagu xasilinayey buundada way dhammeystirantay dayactirka ugu dambeeyana wuxuu bilaabanayaa deyrta. [Wax badan halkan kaga ogow dayactirka buundada sare.](#)



SIYAABAHA LOO SOCDAALI KARO IYO SIDA AAD GACAN UGA GEYSAN KARTO

Iyadoo la qaaday xanibaaddi COVID, waddooyinkii waxey noqonayaan mashquul. Waxanu ka shaqeyneynaa inaan dhisno mashaariic dhiir-gelinaya badqabka oo yareynaya saameynta baabuurta ku leeyihiin xaafadaha.

Adiga xittaa waad caawin kartaa! **Haddii aad awooddo, iska daa wadidda.** Baaskiilee, soco, ruclee, mooteey, bas ama feeri raac, ku biir faanka la wada raaco, ama xaafadda iska joog. [Wax ka badan ka ogow siyaabaha kale eed u socdaali karto.](#)



HA KU DUL WADIN BUUNDADA SPOKANE ST SWING BRIDGE IN LAGUU OGGOLAADO MOOYEE

Buundada hoose way ka xiran tahay baabuurta maalmaha toddobaadka 8da subax ilaa 9ka galab iyo dhammaadka toddobaadka 8da subax ilaa 9ka fiidkii. **Baabuurta aan loo oggoleyn waxey heli doonaan 75 doolar oo tikid ah.** [Eeg haddaad u qalanto inaad ku dul wadi karto buundada hoose ama halkan kaga dalbo maritaanka.](#) Buundada hoose way u furan tahay dhammaan kuwa soconaya, baaskiileynaya, ama rucleynaya.



SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Phone: (206) 400-7511

Email: WestSeattleBridge@seattle.gov

Isu diiwaan geli helidda wararka: seattle.gov/westseattlebridge



Seattle
Department of
Transportation